# Qorshayaasha Ka-hortagga Dhibaatooyinka Shakhsiyeed (IAPP) ee Daryeelka Guriga

# Horumarinta IAPP

**Xeerarka Minnesota, qaybaha 144G.42, farqadda 6(b); iyo 626.557, farqadda 14 waxay farayaan in la diyaariyo IAPP.**

**Qorshaha waa inuu ka koobnaadaa 1) Qiimeyn ama dib-u-eegis shaqsiyeed oo lagu ogaanayo in qofka u nugul yahay tacaddiga ay dadka kale u geysan karaan,**
**2) Qiimeyn ku saabsan halista uu qofka u leeyahay in uu dhibaato u geysto waayeel kale oo nugul, iyo sharaxaad cad oo ku saabsan tallaabooyinka laga qaadayo si loo yareeyo halistaa, 3) Iyadoo sidoo kale lagu darayo halista is-dhibaateynta.**

- **IAPP looma tixgeliyo qiimeyn caafimaad ama qiimeyn kalkaalinnimo.**
- **Tusaalooyin is-dhibaateynta**
  - Qofka deggan wuxuu leeyahay taariikh muujinaysa inuusan qaadan daawooyinka ka-hortagga xanuunnada dhimirka, isla markaana uu ku jiro go'aan maxkamadeed oo daryeel qasbi ah..
  - Qofka deggan wuxuu leeyahay taariikh fikir isdil iyo isku dayo uu isku dayay inuu jeexo canqowgiisa, taas oo sababtay saddex jeer oo isbitaal loo dhigo.
  - Qofka deggan wuxuu leeyahay taariikh muujinaysa inuusan qubaysanin ama mayraysanin, wuxuuna si joogto ah ugu dhacaa kaadidda ama saxarada aan la xakamayn karin, iyadoo nabarro cadaadis ah ay ka sii darayaan.

**Yaa looga baahan yahay inuu haysto IAPP?**

Dhammaan dadka adeegyada ka hela Daryeelka Guriga.



**Goorma ayaa la dhammeystiraa ama dib loo eegaa IAPP-ga?**

- Marka uu qofka ku biiro adeegyada.
- Marka ay isbeddel ku yimaadaan halista ama nuglaanshaha macaamilka.
  - Tusaale ahaan, haddii la ogaado in macaamilka joojiyay qaadashada daawooyinkiisa taasoo keentay dhibaato caafimaad-dhimir iyo isbitaal-dhigis, waa in dib loo eegaaIAPP-ga macaamilka si loogu muujiyo nuglaanshaha (dhacdada), isla markaana loo diyaariyo qorshe lagu ilaalinayo si uu uga badbaado is-dhibaateynta.

**Xusuusnow:** IAPP ma aha qalab lagu qiimeeyo; waa qorshe khasab ah oo qeexaya sida bixiyaha daryeelka la-caawiyo ee shatiga leh uu u hirgelinayo tallaabooyinka badbaadada si uu uga caawiyo ilaalinta qofka deggan tacaddi suurtagal ah, uga hortago inuu qofku dhibaato u geysto dadka kale, isla markaana uu u yareeyo khatarta is-dhaawicidda—dhammaan gudaha baaxadda adeegyada bixiyaha iyo deegaanka daryeelka.

**Yaa la samayn kara IAPP qofka deggan?**

Ma jiraan shuruudo qeexaya shaqsiga diyaarin kara IAPP-ga; qof kasta oo shaqaalaha ka tirsan oo xarunta hubiso inuu leeyahay aqoon iyo karti uu ku qiimeyn karo halista qofka deggan ayaa samayn kara. Waxa ugu muhiimsan waa waxa ku jira qorshaha.

**Illooyinka loo adeegsan karo Diyaarinta IAPP:**

*Welcome to your new services (Ku soo dhawoow adeegyadeena cusub)*

*Developing the IAPP Home Care Providers (Horumarinta Qorshaha Ka-hortagga Dhibaatooyinka Shakhsiyeed)*

**LA XIRIIR**
Minnesota Department of Health
651-201-4200

DEPARTMENT OF HEALTH